# Markhaatiga oo jooga maxkamadda

CJS

Nidaamka xeerka dembiga

Haddii lagu waydiiyo inaad noqotid markhaati dembi eegis ama dhegaysi maxkamadeed, qayb wayn ayaad ka qaadanaysaa gudbinta xaqa.

Maadaama aad dhaaratay inaad runta sheegtid adigoo xaqiiqada ka hor sheegaya maxkamadda horteeda, waxaad u sameeneysaa qaalliga (ama xaakinka iyo Xeerbeegtida haddii lagaa yeero inaad markhaati ka noqotid maxkamadda) u sahlaysaa inuu fahmo siday wax run ahaan u dhacay.

Inta aysan maxkamdaha go'aan ka gaarin qofka inuu yahay dembiile ama uusan dembi gelin, waxay u baahan yihiin inay dhegaystaan isla markaana eegaan waxa jira – markhaatiyaasha waa kuwa sheega waxa jira.

**Waad ku mahadsan tahay waqtigaaga iyo fursadaada.**

# 01 Waa maxay ahaanshaha markhaati?

## Maxaa lagaaga codsanayaa inaad markhaati noqotid?

Waxa lagu waydiinayaa inaad markhaati noqotid haddii aad:

- wax ka og tahay dembi, shil ama muran, matal ahaan, haddii aad aragtay markay dhacayeen arrimahaas;
- leedahay xirfad gaar ah kaasoo wax ka taraya ka go'aan gaaridda arrimaha maxkamadda (waxaad noqonaysaa markhaati xirfadeed); ama
- aad taqaan qof ka mid ah dadka arrinta galay (waxaad noqonaysaa markhaati qofeed). Waxa lagu waydiinayaa inaad ka jawaabtid, matal ahaan, sida aad qofkaas u taqaan ama haddu isagu/iyadu ay tahay qof aamin ah.

## Sidee buu u eg yahay markhaati ahaanshaha?

Waxaa suurtowda inaadan garanayn waxa aad filayso markii laguu yeero markhaati ahaan – ama waxaa suurtowda inay arrimuhu ka duwan tahay waxaad filayso.

Warqaddan waxay kugu taageeraysaa waxa aad la kulmayso Waxay kuu fasiraysaa:

- halka aad ka helaysid taageero dheeri ah iyo talo haddii aad tahay markhaati;
- halka aad ka bixinayso markhaatiga – maxkamdaha kala duwan;
- qofka jooga maxkamadda iyo micnaha luqadda sharciga;
- waxa dhacaya intaadan tegin maxkamadda;

- waxa dhacaya markaad joogto maxkamadda; iyo
- waxa dhacaya marka aad bixisid markhaatiga.

Xusuus: **haddii hadal lagaa qoro ka dibna lagu waydiiyo inaad ka markhaati furtid maxkamadda, waa inaad yeeshaa.**

Haddii aad ku qabtid wax dhib ah ama arrin ku saabsan aaditaanka maxkamadda, waa inaad la socodsiisaa qofka ku waydiiyay inaad aadid maxkamadda sida ugu dhaqsaha badan. Haddii lagaaga yeero maxkamadda laakiinse aad adigu doonayn inaad aadid, waxaa suurtowda inay kuu soo diraan warqad amar ah inaad maxkamadda timaatid. Haddaadan tegin maxkamadda sabab la'aanteed awgeed, maxkamadda waxay kugu eedayn kartaa 'yasid maxkamadeed' waxayna kuu soo dirayaan warqad xarig.

# **02** Xagee baad ka heli kartaa taageero iyo war dheeri ah ee ku saabsan markhaatigaaga?

Waa caadi in dadku walwalo markuu maxkamad ka marqaati furayo. Waxaa suurtowda inaad hubin waxaad sheegayso, ama sidaad u sheegaysid, inay wax ka tarayso cadaaladda sida loo samaynayo.

Dadka ka shaqeeya qaybta dembiga waxay u leeyihiin qibrad waxa adiga kugu cusub, waxayna intay awooddooda kugu taageerayaan inay hubiyaan in lagu wanaajiyo lana eego xasaasiyaddaada.

## Hawlgalka Markhaatiga

Waxaad la hadli kartaa qof mutadawac tababaran oo ka socda Hawlgalka Markhaatiga intaadan aadin maxkamadda, isla mutadawacaas oo ku caawimi karaa  wuxuu joogaa maxkamadda. Wuxuuna kaalana hadli karaa arrin ku saabsan dhacdada wuxuuna ku siin karaan talo, saaxiibtinnimo ayuu ku tusanayaa wuxuuna kula socodsiinaa siday wax u dhacayaan.

Maxkamadda walba ee dembiga qaada ee ku taal England iyo Wales waxay leedahay Hawlgalka Markhaatiga. Hawlgalkaan waxaa qabta hay'ad qarameed ee madax bannaan, Victim Support, waxay taageertaa dadka ay wax gaareen iyo markhaatiyaashaba (haddii uu yahay eedaysane ama is-difaac), iyo qoysaska iyo saaxiibada, muddada ka horraysa maxkamadda, intay socoto iyo ka dibba. Hawlgalka Markhaatiga waxay warqado u diraysaa markhaatiyada inta aan lagaarin dhegaysiga maxkamadda si ay u taakulayso hawl-qabadkooda.

Mutadawacyada tababaran waxay bixiyaan hawl-qabad lacag la'aan ah isla markaana ah mid qarsoodi ah waxaana ka mid ah:

- war guud oo ku saabsan socodka maxkamadda;
- taakulayn shaqsi inta ka horreysa maxkamadda, marka ay socoto iyo ka dib;
- qof kuu raaca maxkamadda haddii aad bixinaysi wareysi; iyo
- inta ka horreysa maxkamadda oo aadan bixin wareysi si aysan kuugu noqon wax kale.

Waxaad ka heli kartaa tifaftirka maxkamadda buugagta telefoonnada.

**Ama, waxaad la xiriir kartaa khadka Victim Supportline 0845 30 30 900.**

## Warar ka sii badan

Waxaa jira axdi ay leedahay Maxkamadda Boqortooyada (Crown Court) loona yaqaan 'Axdiga Isticmaalayaasha Maxkamadda', kaas oo sheegaya qodobada ugu muhiimsan ee aad filayso markaad imaanayso maxkamadda. Haddii aad wacdo telefoonka 020 7210 2269 ee Xarunta Hawlgalka ee Maxkamadda (Court Service Headquarters) waxaad ka heli kartaa nuqul. Maxkamadaha Qaalliyada qaar waxay leeyihiin axdiyadooda, kaas oo aad ka heli karto maxkamadda laftigeeda.

Isla warqadahaan waxaad heli kartaa iyagoo ay ku qoran yihiin Bangooli, Kantonees, Gujaraati, Hindi, Bunjaabi, Urdu, Soomaali, Fietnaamiis, Griik, Turki and Carabi.

Waxaa xitaa aad heli kartaa iyagoo ay ku qoran yihiin far waayayn (Braille), ama iyagoo cajlado ku duuban. Kala xiriir tifaftir xarunta boliiska degmadaada ama xafiiska Hawlgalka Markhaatiga.

Waxaad heli karta warar caadi ah ee ku saabsan xeerka cadaaladda dembiyada (boliiska, maxkamadaha iyo Xafiiska Xeer-ilaalinta) oo waxaad kale oo ka heli kartaa war ka sii badan halkaan www.cjsonline.org.

(UK Online waxay bixiyaan Internet lacag la'aan ah ama mid riqiis ah kaas oo laga helo in ka badan 6,000 xarun waddanka England. Wac 0800 77 1234 si aad u heshid xarunta kuugu dhow).

# **03** Halkee ka bixinaysaa markhaatigaaga?

Waxaa jira saddex nooc ee maxkamadeed oo lagaaga yeeri karo markhaati.

- Maxakamadda Qaalliga
- Maxkamadda Boqortooyada
- Maxkamadda Dhallinta

Qofka ama hay'adda kuu qoraysa inay kuu sheegto goorta iyo halka lagaa rabo markhaati ahaan waxay ku soo dari doonaan  tifaftirka nooca maxkamadda laga dhegaysan doono arrinta.

## Maxkamadda Qaalliga

Arrimaha dembiyada ee la hor keeno maxkamadda waxaa lagu qaadaa maxkamadda qaalliga.

Qaalliga wuxuu dhegaystaa arrimaha oo idil – xitaa wareysiga aad adiga iyo markhaatiyada kale aad bixiseen – kaas oo laga go'aan qaadanayo hadduu eedaysanaha (ama is-difaacaha) uu yahay dembiile. Haddii is-difaacaha lagu helo dembi, qaallliga garsooraha go'aanka ayuu xukumaa.

Qaalliyaasha waxay noqon karaan saddex qofood ee degmada (waxaa kaloo loo  yaqaan xaakimiinta nabadda ama jps), waxaa la shaqeeya la-taliye qareen, ama waxaa suurtwoda inuu yahay hal qof (oo loo yaqaan qaalliga degmo kaasoo ah sharciyaqaan). Qof ka tirsan maxkamadda qaalliga ma qaato geedka madaxa la gashto ee cad oo ay qaataan xaakimiinta iyo qareen sida laga arko telefiishinnada, kal-kaaliyaasha oo keliya ayaa qaata toob madow.

Waxaa jooga qareen (ama koox qareenna ah) oo u hadla xeer-ilaalinta. Inta badan qareen kale (ama koox qareen) ayaa u hadla is-difaacaha – kaa soo loo yaqaan eedaysanaha.

Sawirkaan wuxuu muujinayaa sida uu u eg yahay maxkamadda qaalliga. Qaalliga wuxuu fariistaa kursi kor u kacsan markhaatiyadana waxay dhex istaagan sanduuq horay yaal.




**Furaha kalmadaha:**

A Markhaati B Qaalliga C Karaaniga maxkamadda
D Qareenka xeer-ilaalinta iyo kuwa is-difaacayaasha
E Kalkaaliyaasha maxkamadda F Is-difaace
G Kuwo kale

## Maxkamadda Boqortooyada

Garta la hor geeyo garsoore iyo xeerbeeg ee Maxkamadda Boqortooyada inta badan waa kuwa arrimahooda ay yihiin  dembi wayn, ama hadduu is-difaacaha dalbado in kiiskiisa lagu qaado Xeerbeegti ahaan.

Maxkamadda Boqortooyada inta badan waa kuwa arrimahooda ay yihiin dembi wayn, ama hadduu is-difaacaha dalbado in kiiskiisa lagu qaado Xeerbeegti ahaan. Garsooraha waxaa suurtowda inuu kiis u diro Maxkamadda Boqortooyada haddii uu dareemo inuusan lahayn awood uu ku  xukumo culayska dembiga, haddii is-difaacaha lagu helo dembi.

Ka dib markay dhegaystaan kiiska, Xeerbeegtida waxay garsooraha u sheegaysaa haddi is-difaacahu uu yahay ‘dembiile’ ama uusan ‘dembiile ahayn’. Xaakinku wuxuu go’aan ka gaarayaa wixii ku saabsan xagga sharciga. Hadduu/hadday is-difaacaha qirto/qirato dembiga, xaakinku waxaa kale oo uu go’aan ka gaaraa mudada xukunka.

Maxkamadda waxaa jooga qareen (ama koox qareenna ah) oo u hadla xeer ilaalinta. Inta badan qareen kale (ama koox qareenna ah) ayaa u hadla is-difaacaha – kaas oo loo yaqaan eedaysanaha.

Sawirkaan wuxuu muujinayaa sida uu eg yahay maxkamadda dhallinta. Garsooraha wuxuu fariistaa kursi kor u kacsan markhaatiyadana waxay dhex istaagan sanduuq horay yaal.




**Furaha kalmadaha:**

A Markhaati B Garsooraha
C CKaraaniga maxkamadda
D Qareen xeer-ilaalinta iyo kuwa is-difaacayaasha
E Xubnaha Xeerbeegta F Is-difaace

## Maxkamadda Dhallinta

Inta badan dhib sameeyaasha 18 jirka ka hooseeya waxaa lagu qaada maxkamadda dhallinta kuwaas oo ay joogaan xaakimiin si gaar ah loo tababaray ama qaalliga degmada. Xeerbeegtigu ma galaan arrimahaan oo kale. Isaga oo uu ka duwan yahay maxkamadda garsooraha iyo kan Boqortooyadaba kuwaas oo ay u furan tahay dadka oo dhan, sida,

- xubanaha iyo saraakiisha maxkamadda;
- labada dhinac ee kiiska isku haya iyo wakiilladooda sharciyeed;
- markhaatiyaasha;
- dadka kale ee sida tooska ugu lug leh kiiska; iyo
- xubnaha war-isgaarsiinta iyo dadka kale kuwaas oo ay maxkamaddu u oggolaatay inay goobjoog noqdaan. (war-isgaarsiinta way faafin karaan arrimaha dhacdada laakiin caadi ahaan ma shaacin karaan magacyada dhallinta kiiska gashay).

Cunug ama qof yar laguma qaadi karo kiis maxkamadda dhallinta haddii isaga ama iyada lagu eedeeyo:

- dil ula kac ama dil kama' ah (kiisaskaan oo kale waxaa la horgeeyaa Maxkamadda Boqortooyada);
- dembi culus sida, dhac, isla markaana ay maxkamadda dhallinta ayaa qaada haddii loo baahdo Maxkamadda Boqortooyada
- la kulmo midka dad waawayn (qof 18 jir ah ama ka badan) – kiisaskaan waxaa lagu qabtaa maxkamadda qaalliga.

Sawirka wuxuu tusayaa maxkamad dhallineed ee caadi ah. Garsooraha inta badan wuxuu fariistaa meel la siman inta kale ee maxkamadda.




**Furaha kalmadaha:** A Markhaati B Garsoore C Karaaniga maxkamadda D Qareenka xeer-ilaanta iyo is-difaacaha E Waalidka is-difaacaha F Eedaysahanaha dhallinta ah G Kooxda shaqada H Kalkaaliye

# **04** Yaa jooga qolka maxkamadda

- Is-difaacaha
- Qareen
  - Xeer-ilaalinta
  - Is-difaacaha
- Markhaatiyaasha (adigana aad ku jirto)
- Garsoorayaasha, qaalliga degamada ama garsoore
- Xeerbeegta (Maxkamadda Boqortooyada oo keliya)
- Karaaniga maxkamadda
- Kalkaaliyaha maxkamadda
- iyo dad kale

## Is-difaace

Is-difaace (xataa loo yaqaan 'eedaysane') waa qofka ku eedaysan dembi.

## Qareen

Hal qareen (ama koox qareemo ah) ayaa u hadli doona xeer-ilaalinta mid kalena wuxuu u hadli doonaa is-difaacaha. Haddii ay jiraan is-difaaceyaal mid ka badan, is-difaace waliba wuxuu yeelan doonaa hal qareen.

Dembi qaadidda inta badan waxaa sameeyaa Hawlgalka Xeer-ilaalitna Boqortooyada (Crown Prosecution Service (CPS)) iyada oo uu wakiil ka yahay Boqortoodayda (Boqoradda). Tan waa sababta keenta in aad aragtid ama aad maqashid R iyo 'magaca is-difaacaha' halka 'R' ay ka joogto 'Regina' ama Boqorad. Xeer-ilaalitna Boqortooyada waxay go'aan ka gaartaa kiiska lagu qaadayo eedayn ay baareen boliiska, ama haddii ay sidaas noqoto dembiga lagu qaadayo is-difaacaha.

Labada qareen waxay isku dayayaan in ay ka dhaadhiciyaan garsooraha ama Xeerbeegtida waxa la keenay sida ay ugu dhowdahay runta.

## Markhaatiga (adiga aad ku jrito)

Waxaa jira makhaati uu keeno xeer-ilaalinta (kaas oo markhaatigiisa loo adeegsado inuu is-difaacaha uu dembiile yahay) ama dhibanaha (uusan dembiile ahayn).

Haddii laguugu yeero markhaatii xeer-ilaalineed ama markhaati dhibane waxay ku xiran tahay dhinaca uu waxtar u leeyahay ogaantaada.

## Garsoorayaasha, qaalliga degmada ama xaakin

Garsoorayaasha, qaalliga degmada ama xaakin waxaa suurtowda inuu ku waydiiyo su'aalo ku saabsan markhaatigaaga. Kiis qaadidda Maxkamadaha Boqoryada, ama Xeerbeegta waxay qori karaan su'aalo ay u gudbinayaan garsooraha. Ka dib garsooraha waxay waydiiyaan markhaatiga.

Haddii eedaysanaha lagu helo dembi (lagu cadeeyo), garsooraha, qaalliga degmada ama xaakin go'aan ayay ka gaaraan kiiska (waxa ku dhacaya eedaysanaha, sida ganaax, hawl-qabad bulsho ama xabsi).

## Xeerbeegta (Maxkamadda Boqortooyada))

Xeerbeegta waxay ka kooban tahay 12 qofood, kuwaas sida ugu dhow, ay wakiil ka yihiin 'dadwaynaha guud'. Maadaama xeerbeegta loo xulanayo si kama' ah, waxaa suurtowda inay noqdaan dad da'dooda ay kala duwan tahay, leh dhaqammo kala duwan, sameeya shaqo kala duwan.

Marka ay xeerbeegta dhaqaysato kiiska oo dhan, iyo waxa aad adigu leedahay (iyo markhaatiyada kale) waxay isku wareestaan qol gaar ah waxa ay dhegaysteen. Waxay ka wada hadlaan kiiska. Haddii ay hubaan waxa ay dhegaysteen inuu eedaysanaha uu falay dembiga, waxay gaarayaan inuu yahay dembiile. Haddii ay xeerbeegtu hubin inuu eedaysanaha yahay dembiile, waa inay gaaraan inuusan ahayn dembiile.

Hal xubin ee ka tirsan xeerbeegta ayaa noqda 'hormuud' wuxuuna maxkhamadda u  sheegaa waxay 12koodu gaareen. Tan waa go'aanka. Qof walba ee jooga maxkamaddana wuu dhegaystaa go'aankaas.

Mar marka qaarkood, 12ka iskuma raaci karaan go'aan inuu eedaysanaha yahay dembiile ama uusan ahayn, xataa haddii ay ka hadlaan maalmo ama dowr usbuucyo. Haddii ay taas dhacdo, garsooraha wuxuu u sheegayaa in go'aan la gaari karo xataa haddii ay 10 ka mid ah ay isku raacaan (go'aanka inta badan). Haddii aan la helin cod badan, xeer-ilaalinta waa inay waydiisaa haddii mar kale la qaadayo kiiska, taas oo ay micnaheedu tahay in kiiska mar kale la qaado iyada oo ay joogaan xeerbeeg cusub. Haddii uusan xeer-ilaalinta dalban mar kale in kiiska la qaado, eedaysanaha waa dembilaawe.

## Karaaniga maxkamadda

Karaaniga maxkamadda wuxuu hubinayaa qof walba oo laga doonayo maxkamadda inuu imaado, siday wax u dhacayaan inay u dhacaan siday u yihiin. Iyada ama isaga wuxuu/waxay eegaysaa kiisaska kale hadduu garsooruhu u baahdo warar badan. Maxkamadaha kale, karaaniga, oo loo yaqaan la taliyaha sharciga, wuxuu xataa siiyaa garsooraha talo ku saabsan sharciga.

## Kalkaaliyaha maxkamadda

Marka uu qareenku dalbado in qof loogu yeero markhaati ahaan, kalkaaliyaha waa kan aada dibadda una yeera markhaatiga.

## Dadka kale

Dad kale ayaad ku arki doontaa maxkamadda ay ka mid yihiin saraakiisha boliiska, saraakiisha dembibaarista, xubanaha Hawlgalka Markaatiyaasha iyo wariyeyaal. Maxkamadaha qaar, dadka waxaa loo oggol yahay inay ka daawadaan kiiska qaybta dadka loogu tala galay. Waxaa ka mid noqon kara saaxiibada ama qaraabada dadka kiiska ku jira.

# **05** Maxaa dhacaya intaadan tegin maxkamadda?

Haddii aad tahay markhaati xeer-ilaalineed, caadi ahaan waxaad booliska ka helaysaa 'warqad digniin markhaati'. Tan waxay kuu sheegaysaa marka iyo halka lagaa doonayo inaad ka markhaati furtid. Waxaa suurtowda inaan lagu siin muddo ka badan laba usbuuc inta uu kiiska bilaaban. Waa qareen inuu kuu sheego marka kiiska la dhegaysanayo, laakiin inta badan qofna kama war hayo marka uu bilaabanayo ilaa la gaaro gelinka dambe ee maalinta ka horreysa.

Haddii aad tahay markhaati is-difaace, qareen ayaa kula soo xiriiraya si uu kugu sheego marka ay maxkamaddu bilalabanayso.

Haddii boliiska ama qareenka is-difaace uu kaa qaado wareysi, waxay kuu sheegayaan marka lagaa doonayo maxkamadda. Maxkamadda waxay isku dayaysaa inay qaado kiiska marka ay ku suuban tahay qof walba ee ku jira kiiska. Hase yeeshee markhaatiyadana waa inay sameeyaan wax walba si ay u bixiyaan markhaatiyadooda.

## Ka maqnaashaha shaqada

Haddi aad doonayso inaad ka fasax qaadatid shaqada, madaxa shaqaada waa inaad tustaa warqadda maxkamadda taasoo sheegaysa inaad aadayso maxkamadda. Shaqadaada kuma siinayso lacag inta aad shaqada ka maqan tahay oo aad markhaati ahaan u joogtid. Laakiin haddii ay lacag kaa lumayso, waxa aad dalban kartaa guunnada markhaatiga (eeg bogga 23 tifaftir ku saabsan dalbashada lacagta). Lacagta aad ku helaysid daqligaaga waa ka yar yahay intaad qasaartay.

## Fasaxyada

Waa inaad tagtaa maxkamadda xataa haddii ay tahay marka aad fasax lahayd. Waxaad beddeli kartaa waqtiga fasaxaaga. Ogow beddelka waqtiga dambe inaad qasaarayso lacag. Caymiska fasaxaaga waxaa suurtowda inay ku daboolin haddii dalbashada ticket-ka uu ka dambeeyo kiiska marka la qaadayo.

## Dhibaato caafimaad

Haddii aad u xanuunsan tahay maalinta maxkamadda lagaa doonayo la xiriir karaaniga maxkamadda ama qareenka ka codsaday inaad maxkamadda markhaati ka furtid.

Waa inaad takhtarkaaga waydiisaa inuu ku siiyo warqad takhtareed una dir qofka ku waydiistay inaad markamadda timaatid. Haddii aad warqadda heshid maalinta maxkamadda, waa inaad wacdaa maxkamadda ka dibna aad faakis ahaan ugu dirtaa sida ugu degdegsiinyaha badan.

Hadday jirradaadu qaadanayso maalmo badan ama muddo badan, la xiriir xeer-ilaalinta ama qareenka is-difacaha waydiina inay wax kale diyaariyaan sidaad u bixin lahayd wareysiga. Matal ahaan, waxaa suurtowda inay maxkamaddu oggolaato in dhegaysiigagii hore la qaato.

## Dhibaata kale

Hadday jiraan sababo kale oo aadan ku tegi karin maxkamadda, waa inaad la xiriirtaa maxkamadda sida ugu dhaqsaha badan.

## Maxaa loo baahan yahay inaad samaysid

Qofka kaa codsaday inaad maxkamadda timaatid waa inuu kuu sheega sidaad ku imaan kartid maxkamadda iyo waxa kuu fududayn kara. Xarumaha Maxkamadda Boqortooyada waxay leeyihiin Sarkaalka Hawl-galka Macmiisha oo aad waydiin karto sida ugu fudud ee loo tegi karo maxkamadda. Waxaad ka heli kartaa lambarka maxkamadda buuga telefoonka ee ‘Maxkamadda Boqortooyada’. Warkaan waxaa kugu caawimi kara Hawlgalka Markhaatiyaasha.

Qofka kaa codsaday inaad maxkamadda timaatid waa inaad u sheegtaa:

- Haddii aad cillad qabtid ama baahi gaar ah leedahay taas ay micnaheedu tahay inay caawinaad u baahan tahay maxkamadda dhismaheeda. Maxkamadaha waxay fuliyaan xeerka la yiraahdo Disability Discrimination Act 1995, waa inay sameeyaan taakulayn haboon.
- Haddii ay kula tahay inaad u baahan tahay turjubaan.
- Haddii aad u baahan tahay inaad timaatid maxkamadda intuusan bilaaban kiiska. Tan laftigeeda waxaad kala xiriiraysaa Hawlgalka Markhaatiyaasha ama Sarkaalka Hawl-gal Macaamiisha ee Maxkamadda Boqortooyada. Ama wixii ka dambeeya xilliga Xagaaga 2003, waxaad isticmaali kartaa markhaatiga 'hawada' adigoo adeegsanaya Nidaamka Cadaaladda Dembiga shabakadooda (www.cjsonline.org).

Waa inaad misna la xiriirtaa Hawlgalka Markhaatiyaasha haddii aad u baahan tahay:

- taakulayn qofeed;
- qof kula gala qolka maxkamadda; ama
- war ku saabsan waxa ka dhacaya maxkamadda

## Cabsi-gelin

Waa dembi xun in la cabsi-geliyo (baqdin) markhaatiga xeerbeegta ama dadka caawinaya boliiska wax baaraya. Intay maxkamaddu socoto, ama ka dib, haddii laguu caga-jugleeyo ama laguu hanjabo waa inaad la socosiisaa boliiska ama wakiilka Hawlgalka Xeer-ilaalitna Boqortooyada ama xeer-ilaalinta kale ee maxkamadda. Haddii aad tahay markhaati is-difaace, waa inaad u sheegtaa qareenka is-difaacaha ama wakiilladooda maxkamadda. Haddii aadan aqoon qof aad u sheegto, u sheeg kal-kaaliyaha maxkamadda.

Haddii aad ka walwalsan tahay inaad la kulantid eedsanaha, ama markhaatiyada kale, saaxibadooda, ehelkooda, ama qof kasto oo ku jira kiiska, u sheeg Hawlgalka Markhaatiga, boliiska,

qof ka shaqeeya maxkamadda ama qareenka ku waydiistay inaan u timaaddo markhaati ahaan. Waxaa jira qol gaar ah oo aad ku sugi kartid inta ka horreysa dhegaysiga ama ka dibba.

## Arrimo u gaar ah markhaatiyaasha qatar ama cabsi la gelin karo

Dadka qaar way ku adag tahay inay markhaati bixiiyaan waxayna u baahan yihiin caawimo saa'id ah. Taas waxaa keeni kara sababo badan, sida da'dooda, inay cabsi qabaan ama inay ku walwalsan yihiin sida maxkamaddu u socoto. Nidaam gaar ah ayaa jira oo lagu caawimo dadka noocaan ah (oo loo yaqaan 'markhatiyada xasaasiga ah' ama la baqdin gelin karo) inay dhiibaan markhaatigooda sida ugu fiican.

## Xaq ma u leedahay inaad heshid taakulayn gaar ah?

Waxaa suurta gal ah inaad heli kartid taakulayn gaar ah sida 'markhaatiyada xasaasi ah' haddii:

- aad 17 jir ka yar tahay marka dhegaysiga la samaynayo, ama
- maxkamadda ay la tahay inaad u baahan tahay taageero saa'id ah sababta oo ah:
  - jirrada maskaxda qabtid;
  - si fiican aad wax u fahmayn
  - aad qabtid curyaan jismi ama aad qabti jirro jirka ah

Waxaa xaq u leedahay ilaalin gaar ah sida 'markhaati la baqdin gelin karo' haddii markhaatigaaga uu kuu keeni karo cabsi ama walwal.

Maxkamaddu waxay go'aan ka gaari kartaa haddii aad xaq u leedaha eegid gaar ah. Waxay talo la waydiinayaa boliiska, Hawlgalka Xeer-ilaalitna Boqortooyada ama qareenka is-difaaca, waxayna tixgelinayaan aragtidaada haddii aad u baahan tahay inaad isticmaashid taakulaynta gaarka ah.

## Waa maxay taakulaynta gaarka ah?

- Xaydaan ayaa la dhexdhigaa markhaatiga iyo is-difaacaha si aysan isu arag.
- Markhaatiga wuxuu fariisanayaa qol ka fog meesha kiiska lagu qaadayo isagoo dhiibaya markhaatiga iyadoo la isticmaalayo telefiishin. Markhaatiga wuxuu arki karaa garsooraha, xaakimiinta ama qaalliga degmada iyo qareemmada, dadka jooga maxkamaddana way arki karaan markhaatiga. Qolka loogu tala galay dadka oo dadka laga saaro iyagoo ay joogi karaan oo keliya xubnaha wariyeyaasha.
- Garsooraha iyo qareennada ma gashtaan dharka toobabaka madow iyo kan timaha ah sida loogu gashado caadi ahaan Maxkamadda Boqortooyada.
- Inta ka horreysa kiiska, markhaatiga waxaa laga fiirsanayaa fiidiyo isaga oo su'aalo ka jawaabaya uuna la joogo wakiilkiisa shariciyeeed. Fiidiyahaas waa la arkaa.
- Inaad tahay markhaatiga ugu muhiimsan (af-hayeenka ugu mihiimsan inta ka horreysa wareysiga).
- Markhaati dhallin ah oo ka yar 17 ama qof wayn oo xasaasi jismi ahaan, maskax ahaan ama xag barasho ama cillad kale leh waxaa loo oggol yahay inay isticmaalaan qalab isgaarsiinta (matal ahaan, xuruufaha.
- Markhaatiga oo ay wareystaan dhinaca kale ee kiiskaSu'aalaha oo la duubay fiidiyo ahaan loo tusayo halka laga wareysan lahaa markahaatiga.
- Maxkamadda inay oggolaatay qof wakiilka ka ah cunug si ay u caawinto cunug ka yar 17, ama qof wayn oo markhaati ah oo xasaasi ah sababta jirsmi ahaan ama maskax ahaan ama waxbarasha ahaan ama cillad kale, si ay warka isku dhaafsadaan isaga iyo wakiillada sharciga iyo maxkamada.

## Hawl-gallada gaarka ah ma jiraan hadda?

Baahida gaarka ah si tartiib ayaa loo hirgelinayaa sidaas daraadeed hawlgalkaas ma aha wax wada diyaar ah.

### Maxkamadda Boqortooyada gudaheeda

Baahida gaarka ah, oo aan ka mid ahayn fiidiyaha la duubo marka wax la su'aalayo markamadda ka hor iyo isticmaalka dadka u dhexeeya, way jiraan. Labada baahi waa la tijaabinayaa inta aan lagu hawl-gelin. Xataa, fiidiyaha laga duubo marqaatiga xasaasiga waa la helaa.

### Gudaha maxkamadda dhallinyarada

Baahida gaarka ah oo keliya ee laga helo maxkamadda dhallinyarada hadda waa nooca isku xirka tiifiiyaha iyo fiidiyaha kaas oo lagu duubo markhaatiga muhiimka ah ee loogu tala galay markhaatiga cunugga ka yar 17 kaas oo lagu qaado kiisaska ku saabsan kufsasho, dagaal (ay ku jirto hanjabaad) iyo xaasidnimo.

## Ma jiraa wax loogu talagal markhaatiyada caruurta?

Inta badan Maxkamadaha Boqortooyada waxay leeyihiin wax loogu tala galay markhaatiyada carruurta ah. Xarumaha Maxkamadaha Boqortooyada waxay leeyihiin Sarkaalka Markhaatiga Carruurta kaas oo:

- Ka jawaaba su'alaha ku saabsan waxa lagu helo maxkamadda iyo siday maxkamadda u soconayso;
- Fasira sida uu u shaqeeyo isku xirka telefiishinka; iyo
- Loogeeyo cunug ama waxa wehesha meel gaar ah ay wax ku sugaan.

Haddaad tahay waalidka ama ilaaliyaha cunug markhaati ah, waxaad la xiriiri kartaa Sarkaalka Markhaatiga Carruurta ama Hawl-galka Markhaatiga haddaad doonayso war intaas ka badan.

# **06** Aaditaanka maxkamadda

## Qarashka

Waxaad dalban kartaa qarashka safartaada maxkamadda, iyo gunnada cuntada iyo wixii dhaqaale ah ee kaa lumay, sida ilaalinta curruurta. Inta aad dalban kartid waxay ku xiran tahay inta ay le'eg tahay waqtiga aad ka maqnaan doontid aqalkaaga ama shaqada. Waxaad dalban kartaa oo keliya qarashka inta ay ku tiraahdo maxkamadda waad bixi karaysaa.

Haddaad tahay markhaati xeer-ilaalineed, waydii wakiilka Hawlgalka Xeer-ilaalitna Boqortooyada ama shaqaalaha maxkamadda foom wax lagu codsado markaad tagto maxkamadda. Waxaa suurtowda inaad lacagta lagu siiyo 5 ilaa 10 maalmo shaqo ka dib markay Hawlgalka Xeer-ilaalitna Boqortooyada foomkaaga oo la buuxsha helaan.

Haddaad tahay markhaati is-difaace, waydii shaqaalaha maxkamadda foomka codsashada.

Haddaad u baahan tahay in lagaa caawimo foomka, Hawlgalka Markhaatiga ama shaqaalaha maxkamadda waydi.

IMar marka qaarkood, waxaa suurtowda in loo hormariyo lacag dadka aan awoodin inay yimaadaan maxkamadda. Waa inaa la xiriirta qofka ku waydiistay inaad maxkamadda timaaddo haddaad u baahan tahay in laguu hormariyo qarashaka.

## Safartal

Mar marka qaarkeed, dadka wuxuu ka walwalaa inay waqti ku yimaadaan maxkamadda, hadday heli karaan meel ay baabuurka dhigtaan ama meesha ay ka heli karaan gaadiid. Arrimahaan waxay siisaa kalsooni waxayna siinaysaa waqtiga markii la gaaro inay bixiyaan markhaatigooda.

Qofka kuu yeeraya markhaati ahaan waa inuu ku siiyaa tifatir muuqda markay kula soo xiriiran inaad timaaddid maxkamadda.

Waydii tifatir intaa ka sii badan, sida baabuurta meesha la dhigto, ama haddii cunta iyo cabitaan la heli karo. Waxaad u baahan tahay inaad soo qaadatid lacag naqdi (sida sarrif) si aad isaga bixisid baabuurka meesha la dhigto iyo cabitaan.

## Saaxibada iyo ehelka

Waydii qofka kaa dalbay inaad timaaddo haddii la oggol yahay in saaxibada iyo ehelka la oggol yahay inay yimaadaan maxkamadda. Inta badan uma baahnid inaad waydiisid ruqse. Laakiinse, haddii aad markhaati ka tahay Old Bailey (oo ah Maxkamadda Dhexe ee Dembiyada ee London), waa inaad horey ula xiriirtaa xag ammaanka awgood.

Haddii saaxiibadaa ama ehelkaaga ku wehesha ay yimaadaan maxkamadda, ma waydiin karaan qarashka ah safartooda ama lacagta ay ku qarashgareeyaan cuntada iyo inta ay joogaan halkaas. Hase yeeshee, haddaad u baahan tahay qof inuu maxkamadda kula yimaado si uu kuu caawimo, matal ahaan, si uu ilaaliyo cunuggaga intaad bixinaysi markhaatiga, ama sababta ku saabsan curyaannimo, waxaa suurtowda inay codsadaan qarashka safarta.

# **07** Maxaa dhacaya marka aan joogo maxkamadda?

Mar marka qaarkood, dadku wuxuu ka walwalaa inay heli karaan meesha uu dhismaha maxkamadu ku yaal, ama inay ku habaabin dhismaha gudhiisa, ama ay la hadlan qof aan sax ahayn. Way ku adag tahay inay kalsooni ka helaan ama degganaasho si ay u bixiyaan markhaatigooda.

Imaatinka maxkamadda ma aha wax cabsi leh ama khibrad cadaadis ah. Hadday kula tahay sidaas, taageero iyo caawimo ayaa jira oo aad heli kartid.

## Markaad timaaddo

Waxaa arki doontaa calaamado muuqda oo kugu caawimi doona inaad meesha hesho. Si soo-dhowaynta ama kalkaaliyaha maxkamadda tusna warqadda lagaaga codsaday inaad timaaddo maxkamadda.

Soo-dhowaynta wuxuu kuu sheegi doona halka aad ku sugaysid. Haddaadan la xiriirin Hawlgalka Markhaatiga, waxaa la xiriiri kartaa markaad maxkamadda timaaddo. Haddii aad doonayso inaa la hadasho Sarkaalka Hawl-gal Macmiisha, waydii soo-dhowaynta.

Haddaad tahay markhaati xeer-ilaalineed, wakiilka Hawlgalka Xeer-ilaalitna Boqortooyada ayaa inta badan iskaa bari doona.

Haddii wareysi lagaa qoray, hase yeeshee, aad doonayso inaad aragti intaadan markhaatiga bixin, waa laguu oggol yahay. Haddaad tahay markhaati xeer-ilaalineed, waydii Hawlgalka Xeer-ilaalitna Boqortooyada nuqul. Haddaad tahay markhaati is-difaace, weydii nuqul qareenka. Hadday kula muuqato inay ku caawimayso wareysigaaga, waydii qareenka hadday taas suurta gal tahay.

Kalkaaliyaha, Sarkaalka Hawl-gal Macmiisha ama Hawlgalka Markhaatiga waxay ku tusayaan qolka maxkamadda intuusan kiiska bilaaban. Tan waxaad samayn karta waxa kugu horreeya ee subaxii ama waqtiga qadada.

## Intaadan bixin markhaatiga

Maxkamadda waxay isku dayaysaa inaadan muddo ka badan laba saacadood sugin inta laguu yeerayo.

Dad kale ha kala hadlin arrimaha ku saabsan markaatigaaga intaadan sanduqa markhaatiga tegin. Maxkamadda way ka yaabinaysaa haddii aad taas samayso. Waxaad kala hadli kartaa saraakiisha boliiska ama qareennada (xeer-ilaalinta iyo is-difaacahaba) arrinta jirta, inkastoo aadan kala hadli karin markhaatigaaga.

Hadduu waqti jiro inaad sugto inta kiiska uusan bilaaban, waxaad fariisan kartaa sagxadda dadka adigoo dhegaysan kara kiisaska kale. Haddaad sidaas yeeshid, la socodsii kalkaaliyaha meeshaad aaday. Marka kiiskaagu bilowdo, waa inaad ka baxdaa maxkamadda ilaa laguu yeero. Waa inaadan dhegaysan markhaatiyada.

## Haddi waqtigaaga la gaaro

Marka magacaaga loo yeero, kalkaaliye ayaa ku tusi doona sanduuqa markhaatiyada. Maxkamadda Boqotooyada, tan inta waxay tahay inaad hor ku toosan tahay xeerbeegta.

Waxaa lagaa rabaa inaad taagnaato intaad bixinayso markhaatiga, waa inaad u sheegtaa kalkaaliyaha haddii aad u baahan tahay inaad fariisato. Waxay kuu waydiinayaa garsooraha inaad fariisan karo.

Waxaa lagu waydiinaya inaad dhaaratid. Taas micnaheeda waa inaad dhaarataa inaad runta sheegaysid adigoo ku dhaaranayo kutubkaaga. Haddii aad doonto, waxaad sheegi kartaa inaad runta sheegaysi (ballan qaad) adigoo sheegaya 'runta, runta oo idil iyo wax kale oo aan ahayn runta'.  Kalkaaliyaha waa inuu ku waydiyaa inaad ku dhaaraynso kutubka intaadan qolka gelin.

Isaga ama iyada waxay kaloo waydiin doonaan hadday jiraan dhaqan kale haddii aad doonayso.

## Bixinta markhaatiga

Bixinta markhaatiga markamadda waxay la mid tahay adigoo bixinaya wareysiga. Halka ay qoreenka su'aalahooda – waxay u eg tahay inay su'aalaha dib kuu waydiinayaa ama si ka geddisan kuu waydiinayaan.

- Inta badan, is-difaacyayaasha waxay sheegeen inaysan dembiilayaal ahayn. Markhaatigaaga wuxuu caawinayaa maxkamadda inay go'aan ka gaarto inuu is-difaacaha yahay dembiile ama inuusan ahayn.
- Haddaadan aqoon ama aadan hubin su'aasha lagu waydiiyo, caddee. Waxaad garsooraha, qaalliga degmada ama xaakimiinta waydiin kartaa talo.
- Haka walwalin haddii laguu sheego inaadan arrimaha qaar aadan ka hadli karin markaad markhaatiga bixinayso. Sababtoo ah maxkamadda waxay leedahay nidaam markii la dhegaysanayo.
- Ha degdegin markaad wax sheegayso si tartiib oo fasiix ah u hadal.
- Waydii su'aalaha in laguugu cesho haddaadan fahmin ama aadan maqal.
- Xakimiinta, kan degmada kama warhayaan kiiskaaga, sidaas daraadeed waxba ha ka tegin.
- Mar marka qaarkood markhaatiyaasha waa loo yeeraa xataa haddii is-difaacaha uu qirto dembiga. Tan waxay dhacdaa marka ay jiraan isqilaafsanaan siday wax u dheceen.

Haddii laguugu yeero inaad markhaati xeer-ilaalineed noqotid, qareenka xeer-ilaalinta wuxuu ku waydiin doonaa su'aalo. Ka dibna qareenka is-difaacaha isna su'aalo ayuu ku waydiin doonaa (su'aalo lays waydaarsado). Haddii aad markaati u tahay is-difaacaha, qareenka is-difaacaha ayaa ku wareysan doona marka hore, waxa xiga kan xeer-ilaalinta. Markuu qareen dhammaysto su'aalihiisa waxaad dhex joogaysa sanduuqa markhaatiga. Garsooraha wuxuu ka codsanayaa qareennada kale inay su'aalo ku waydiiyaan. Dadka inta badan waxay ka walwaaln ama la yaabaan su'aalaha iswaydaarsiga ay waydiinayaan qareennada. Waa muhiim inaad xusuusato:

- Ma aha wax shaqsiyeed – waxay tahay waajibka qareenka inuu hubiyo inaadan qalad samayn.
- Adigu maxkamad ma taagnid. Qareennada ma aha inay kaa dhigayaan doqon, ama beenlow. Hadday su'aalaha ay yihiin kuwo kulul, qareennada kuu yeeray markhaati ahaan wuxuu xaq u leeyahay inuu garsooraha ama garsooradda waydiiyo in la joojiyo. Garsooraha ama garsooradda wuxuu/waxay qareenka kale u sheegi karaan inuu joojiyo su'aalaha.
- Sharcigeennu wuxuu ku salaysan yahay inuu is-difaacaha ahayn dembiile ilaa dembi lagu heli. Si loo hubiyo in markhaatiga inuu yahay muhiim waa wax wayn.

Inta badan, is-difaacaha wuxuu leeyahay qareen waxayna ku waydiinayaa su'aalo. Laakiin is-difaacaha wuxuu xaq u leeyahay inuu diido wakiil isaga is difaaco, taas waxay micnaheeda tahay inay ku waydiiyaan su'aalo. Tan waa mid inta badan aan dhicin waana caadi ahaanna uma dhacdo.

Is-difaacaha isagu ma waydiin karo su'aalo qofka dhibanaha ah ama markhaatiga 'la ilaalinayo' (waa qofka markhaati u ahaa eedaysanaha) hadduu galay dembi kufsasho (ama dembiyaal kale ay ka mid tahay carruur). Markaas oo kale qareen waa inuu waydiiyaa su'aalaha.

## Maxaa dhacaya marka aan bixiyo markhaati?

Qareennada iyo garsoorahaba ama garsooradda waxay kuu sheegayaan inaysan su'aalo kale kuu hayn. Garsooraha wuxuu ku mahdinayaa markhaatigaaga wuuna ku sii daynayaa. Taas micnaheeda waa inaad ka bixi kartid maxkamadda. Waxaad aadi kartaa aqalka, amaba waxaad dhaqaysan kartaa kiiska. Laakiin haddii aad tahay markhaati dhallinta laguu ma oogolaan doono inaad joogti.

Inta badan dadka waxaa la waydiiyaa inay markhaati noqdaan ama la dhegaysto. Laakiin, hadduu jiro kiis cusub micnheedu waxay tahay in su'aalo cusub la keeno laguuna yeero.

# **08** Kiiska ka dib

Marka aad bixisid markhaatiga, waxaa dhici karta inaad doonayso inaad ogaatid waxa dhacay. Waad ogaan kartaa haddii eedaysanaha lagu helay dembi ama aan lagu helin – laakiin sidaas mar waliba ma aha.

## Sideen u ogaadaa wixii ka dhacay maxkamadda?

Waxaad ku ogaan kartaa natiijada adigoo la soo xiriira maxkamadda ama waxaad la hadli kartaa qofkii kaa codsaday inaad timaaddid maxkamadda.

## Ma lagu waydiin karaa inaad mar kale noqotid markhaati?

Inta badan laba jeer markhaati ma noqonaysid, laakiin waxaa dhici karta in loo baahdo sabahaan daraadood:

- Hadduu garsoore helo in is-difaacaha dembiile yahay qareenkiisuna uu rac'faan ka qaato go'aanka, waxaa suurtowda in lagaa codsado inaad markhaati furtid mar kale. Rac'faankaan waxaa qabanaya garsoore Maxkamadda Boqortooyada, laakiin waxaa fariisanaya laba xaakimiin ee kale halka ay ka joogi lahaayeen xeerbeegti.
- Is-difaacaha lagu helay dembi Maxkamadda Boqortooyada wuxuu xaq u leeyahay inuu rac'faan dalbado. Caadi ma aha, laakiin, inay Maxkamadda Rac'faanka dhagaysto arrintaan mar kale.
- Haddii ay xeerbeegta Maxkamadda Boqortooyada ay isku afgartan kiiska, mar kale ayaa kiisku dhici karaa waxaana lagu waydiin mar kale markhaatigaaga adigoo hor jooga xeerbeeg. Tan inta badan ma dhacdo.
- Mar kale in la qaado garta waa loo baahan yahay haddi laga shakiyo garta isla markaasna garsooraha ama garsooradda waxay joojin karaan garta. Waxaa lagu sheegi doonaa sababta ay taas ku timid, marka loo baahdo mar kale in la qaado maxkamadda.

Somali
Waxaa daabacay Home Office Communication Directorate Octoobar 2003